



FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
WADAJIR DISTRICT COURT
MOGADISHU-SOMALIA



Summad: MDW 236 /2021

UJEEDO:- SUGITAAN DHAXALKOOB, CADEYN TARIKO, TANAASUL IYO WAKAALAD.

Maanta oo ay taariikhdu tahay 05/05/2021, Waxaa maxkamadda Degmada Wadajir Hor Yimid Markhaatiyaasha kala ah:-

- 1- **Muuse Cilmi Ciyow Maalin**, Somali ah, Ku Dhashay Jalalaqsi, Sanadkii 1960, Ina Xaawo Axmed C/Ille, oo sita W.A.L.1056/Wasaarada Arimaha Gudaha ee Dowlada F.Somalia.
- 2- **Cabdow Haaraay Waasuge**, Somali ah, Ku Dhashay Jalalaqsi Sanadkii 1948, Ina Culumo Barre Cumar, Lana Masawiray Maxkamaduna aqoonsatay.

Waxayna si Wadajir ah Maxkamadda Horteeda uga Caddeeyeen in ay geeriyootay Marxuumad la oran jiray **MARXUUMAD MUXUBO ISAAQ SALAAD**, Kuna Geeriyootay Xamar Sanadkii 2014 labadeedii waalid wey ka geeri horeyeen, Nina ma uusan qabin, hadda la joogana Waxay Ifka uga tagtay oo dhaxlaxa 1 Wiil, iyo 4, gabdhood Waxayna kala yihiin:-

DADKA:-

1- Liin	Maxamed	Cismaan	Degan Xamar	Dhalatay 1965	(Gabadhii Marxumada)
2- Saynab	Maxamed	Cismaan	Degan Uk	Dhalatay 1980	(Gabadhii Marxumada)
3- Canab	Maxamed	Cismaan	Degan Sweden	Dhalatay 1976	(Gabadhii Marxumada)
4- Faaiso	Maxamed	Cismaan	Degan Xamar	Dhalatay 1979	(Gabadhii Marxumada)
5- C/raxman	Maxamed	Cismaan	Degan Kenya	Dhashay 1978	(Wiikii Marxumada)

Waxay kaloo Markhaatiyaashu Caddeeyeen in aysan jirin Cid kale oo Marxuumada dhaxleysa oo Nool ama geeriyootay haday noqon laheyd Asal Ama Farac.

HANTIDA LAGA DHAXLAAYO MARXUUMADA.

Waxay kaloo Markhaatiyaashu caddeeyeen in **MARXUUMAD MUXUBO ISAAQ SALAAD** ay ifka uga tagtay Dhul Banaan oo Darbi Ku Wareegsan yahay oo ku yaal xamar Degmada (Xamar-Jadiid) Lehna **W.L.DH.BB/3/46/2021 Tr.26/01/2021 iyo Rasiid No.10896/21 Tr.26/01/2021** Kana Soo Wada Baxay D/Hoose ee Muqdisho "Ahna Diplicate" Cabirkiisuna dhan yahay (20X20)-M lotto.l.r. (291-) Soodimihiisuna Kala yihiin Waqooyi & Bari Waxaa Ka Mara Jidad inta kalana Waxaa Ka Xiga Dhul dad,

WAKAALADO

Waxay Maxkamadda Degmada Wadajir Sugaysaa In dhaxaltooyada Kala ah 1-Saynab Maxamed Cismaan, 2-Canab Maxamed Cismaan, 3-Faaiso Maxamed Cismaan, ay Soo Wakiisheen **Liin Maxamed Cismaan** Kuna dagan Wadanka ingiriiska Magaca "Liin Shariif Maxamed", Sida Ku Cad 1-)Wakaalad Ref NO. **SOMEMB/FR/WAK/101/21 Tr.02/04/2021** Kana Soo Baxday Safaarada Jamhuuriyadda Federalka Somaliya ay Ku leedahay France uuna Saxiixay Qunsulka Safaarada Axmed M.Xaaji Cali "Axmed Shire" Waxaana Soo Wada Xaqiijiyey Wakaaladaan Wasaarada Arimaha Dibadda ee D.F.Soomaaliya iyo Maxkamada Racfaanka ee Gobolka Banaadir, 2-)Wakaalad Ref NO. **NBDUKBI/1267/21 Tr.30/03/21**, Kana Soo Baxday Nootaayo Banaadir-danuun uuna Saxiixay Dr, Yoonis C/raxmaan Maxamuud (Timacadde), Sidoo kale Faaiso Maxamed Cismaan oo Dhaxaltooyada Ka Mid ah, Kuna Sugaan Muqdisho Waxay Maxkamada Horteeda Ku Wakiilatay **Liin Maxamed Cismaan** "Liin Shariif Maxamed".



=MASAWIRADA MARKHAATIYAASHA=

Muuse Cilmi Ciyow

&

Cabdoow Haaraay Waasuge



MASAWIRKA QOF KA MID AH DHAX/

MASAWIRKA WAKIILKA KANA MID AH DHAXALKA

Faaiso Maxamed Cismaan

Liin Maxamed Cismaan (Liin Shariif Maxamed)



Una soo wakiisheen dhamaantood in ay u maamuli karto, dhaxalkoob u samayn karto, gadi karto, Hibeyn Karto, Wareejin Karto, Qofkasta Qismigiisa Ku Wareejin Karto, Maxkamadaha dalka hortooda u matali karto qof waliba qismiga uu ku leeyahay dhamaan hantida dhaxalka ah oo ay ka dhaxleen **MARXUUMAD MUXUBO ISAAQ SALAAD**.

TANAASUL

Waxay Maxkamadda Degmada Wadajir Sugeysaa in C/raxmaan Maxamed Cismaan uu Qismigii Dhaxalka uu Ku Lahaa Dhaxalka Hooyadiis Marxuumad Muxubo Isaaq Salaad uu u Tanaasulay Dhamaan Dhaxaltooyada Kale Sida Ku cad Warqada **Ref NO.22103/21 Tr.25/04/21**, Kana Soo Baxday Nootaayo Dayax uuna Saxiixay Dr,Aadan Jimcaale Maxamed Laanta Nairobi.

=SAXIIXA MARKHAATIYAASHA=

1-) Muuse Cilmi Ciyow Maalin

2-) Cabdow Haaraay Waasuge

=SAXIIXA QOF KA MID AH DHAXAL.=
Faaiso Maxamed Cismaan

=SAXIIXA WAKIILKA DHAX/ KANA MID AH DHAXALTOOYADA =
Liin Maxamed Cismaan

SUGITAANKA MAXKAMADDA.

Maxkamadda Markay aragtay Codsiga Wakiilka dhaxaltooyadda, Markay dhageysatay marag furka Markhaatiyaasha, Markay Aragtay Dukumintiga Dhulka ee ay Marxuumada ku qoran tahay, Markay Aragtay Wakaaladaha sare ku xusan, Waxay Maxkamada Degmadda Wadajir sugeysaa geerida **MARXUUMAD MUXUBO ISAAQ SALAAD**, oo ay dhaxalkeeda leeyihiin dadka sare ku xusan oo kaliya, waxay kaloo Maxkamaddu sugeysaa in **Liin Maxamed Cismaan**, oo Dhaxaltooyada Ka titsan ay Wakiil buuxa u tahay dhamaan dhaxaltooyadda isla markaana ay awood buuxda u leedahay ku tasarufka Hantida ay ka dhaxleen **MARXUUMAD MUXUBO ISAAQ SALAAD**, ee sare ku xusan, Waana Sugitaan dhaxalkoob,Cadeyn Tariko,Tanaasul iyo Wakaalado ansax ah waafaqsan Sharciga Islaamka iyo qaanuunka dalka, Waxaana lagu qoray diiwaanka guud ee mucaamilaadka.

KAALIYAHA MAXKAMADDA.

C/risaaq Cali Cabdi "Caabi"

GARSOORAHA MAXKAMADDA DEGMADA WADAJIR.

Dr. Axmed Maxamed Cali




Mudane: Muuse Ciyo
Mr: Ciyo
Jagada: Nabadoon
Pocision
Hooyo: Xaawo Akmal
Mother
Kudhashay: Jalala
Place of Birth
Dhashay: 1975
Date of Birth
SAXIIXA X JOOQTO, A. GUUD


Tariikh/ Date 31/3/2019
Lambar/ No: _____
Saxiixa Qofka/ Signature
Muuse

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
 FEDERAL GOVERNMENT
 MINISTRY OF INTERIOR
 NATIONAL IDENTITY AUTHORITY

MAXKAMDA DEG. MADAJIR
 مَكَامِدَا دَعْمَا مَدَايِر





Lam: SOMEMB/FR/WAK/101/21

Ujeedo: WAKAALAD GUUD

L. 541/2021


Waxaa maanta oo taariikhdu tahay 02-04-2021 uu noo soo gudbiyey xafiiska Daryeel Association ee ay xaruntiisu tahay dalka Sweden, xogta xubnaha hoos ku cad:- **Canab Maxamed Cusmaan**, ina Muxubo Isaaq Salaad, dhalatay 02.01.1976kii, lehna baasaboor L.35329294-Sweden.

Ka dib markii ay Safaaradda Soomaaliya ee France dib u hubisay xogta marwadaas, waxa uu caddeynayaa macluumaadka hoos ku xusan:

QIRAALKA WAKAALAD BIXIYAASHA

Aniga oo ah Canab Maxamed Cusmaan, Maskaxdeydu taam tahay, cid i qasabtana aysan jirin, isla markaana ay joogaan 2 marqaati. Waxaan qoraalkaan ku caddeynayaa:- in aan wakaalad gaar ah siiyay **walaashay Liin Maxamed Cusmaan**, ina Muxubo Isaaq Salaad, dhalatay 30.12.1965kii, lehna Baasaboor, L.559771275-GBR, uguna qoran yahay magaca Liin Sharif Mohamed. **Waxaana u wakiishay:-** in ay iibin karto, Wareejin karto, Hibeyn karto, ii qaadi karto qeybteyda dhaxalka, xafidi karto, dhisi karto, dayactiri karto, kireyn karto, ka saari karto, u dacwoon karto, qareen u qaban karto, saxiixi karto kaalinteyda la xiriirta Booska laga dhaxlaayo Marxuumada hooyaday **Muxubo Isaaq Salaad**. Booskaas oo ku yaal Muqdisho, Degmada **X-Jadiid**, Cabbirka **20X20-M**, **Lotto NO. 291**, **Lehna Sabarloog 3/46/2021**, **Tr. 26.01.2021**, **Resiid L. 10896**, **Tr. 26.01.2021**, labaduba duplicate ah kana soo baxeen Dowladda Hoose ee Muqdisho. Sidaas darteed awooddaan aan **Liin Maxamed Cusmaan**, way u madax bannaan tahay wixii hadda ka dambeeyana ma jirto wax aniga la iiga baahan yahay ee ku saabsan qeybteyda dhaxalka aan kor ku soo xusay. Sidaas ayaan ku caddeynayaa qoraalkeygaan.

Saxiixa Marqaatiyaasha


.....
Xuseen Cali Guuleed


.....
Maxamed C/fataax Sh. Cilmi

Magaca iyo saxiixa wakaalad bixiyaasha

Canab Maxamed Cusmaan 

Anigoo ah Ahmed Mohamud Hagi ALI, qunsulka Safaaradda Soomaliya ee France, waxaan maanta oo taariikhdu tahay 02/04/2021, halkaan ku xaqiijinaaya in macluumaadka kor ku qoran, saxiixa marqaatiyaasha iyo saxiixa wakaalad bixiyaha **Canab Maxamed Cusmaan** ay sax yihiin. **F.G** : Warqaddaan ma aha caddeyn milkiyad ama caddeyn lahaansho hanti ee waa qoraal wakiilasho keliya.

Ahmed M. Hagi Ali(Ahmed Shire)
Qunsul Safaaradda Soomaliya-France



Marxuumad MUXUBO ISXAAQ SALAAD K UDHIMATAY XAMAR 2014

- 1- Liin Maxamed Cismaan Xamar
- 2- Saynab Maxamed Cismaan U,K
- 3-Canab Maxamed Cismaan Sweden
- 3- Faaiso Maxamed Cismaan Xamar 1979
- 5-C/raxmaan Maxamed Cismaan 19--- Kenya

- 1- Liin Maxamed Cismaan "Liin Shariif Maxamed" Xamar
Saynab Maxamed Cismaan "Ayaan Maxamed Cismaan UK TEL:- 00447561579701 lester
- 2- Canab Maxamed Cismaan "Canab Maxamed Cismaan Sweden [TEL:-0046720304910](tel:0046720304910) storkhom
- 3- Faaiso Maxamed Cismaan **Xamar**

Dhul Darbi Ku Wareegsan yahay

Lawakiishe

**Liin Maxamed Cismaan 0616478013- Wiilkeeda 0616438723- Nin oday ah oo la socday
0615889542**

Waqooyi Jid iyo Bari Jidad



Somali Republic.

War dhigley Court District

B M- 045/2017

Tr. 08/04/2017

Ujeeddo:-Caddeyn dhaxalkoob ,Tariko ,Qayim iyo iswakiilasho.

Maanta oo ay Taariikhdu tahay **08/04/2017** Maxkamadda Degmada Wardhiigley horteeda Waxaa timid :

Ayaan Maxamed Cusmaan ina Muxubo Isaaq Salaad ku dhalatay B/weyne Sanadkii **1983** kii lehna **B/boor No. P00516894** Soomaali ah deggan Xamar, kana wakiil ah Dhaxaltooyadii **Marxuumad Muxubo Isaaq Salaad** waxayna Maxkamadda ka codsatay in loo qoro Sugitaan dhaxalkoob Tarikadii ay ka Geeriyootay: **Marxuumad Muxubo Isaaq Salaad** Intaas kadib waxay Maxkamaddu u dirtay kana dalbatay Markhaatiyaal Waxayna Maxkamadda hor keentay 3 Marqaati oo magacyadoodu kala yihiin: -

- 1- **Muumin Duqow Liibaan** ina Cawralo Maxamuud Fiidow ku dhashay Beledweyn sanadkii **1950**-kii lehna **B/boor No. P00227840** Soomaali ah.
- 2- **Xasan Maxamed Lugey** ina Cowralo Barre Rooble ku dhashay Muqdisho sanadkii **1970**kii, lehna **B/boor No. P00246909** Soomaali ah.
- 3- **Cilmi Cusmaan Liibaan** ina Xaliimo Cosoble ku dhashay Xamar sanadkii **1970**-kii, lehna **Driving licence ID No. LIBAN701010E09UH 03- UK** ah.

Sedaxda Marqaati waxa ay Maxkamadda horteeda si buuxda uga caddeeyeen kana marag fureen in ay Geeriyootay **Marxuumad Muxubo Isaaq Salaad** geeriyootay sanadkii **2014** tii kana Geeriyootay Tariko ka kooban:-

Guri ku yaala Muqdisho Degmada Wardhiigley cabbirkiisuna yahay **(20x20m)**, **Lotto No. 291**, soodintiisuna tahay waqooyi Jid inta kale Guryo dad. Kuna qoran Warqadda lahaanshaha dhulka **Bollettario No. 19, Bolletta No. 41, Sanadka 1978, Tr. 11/03/1978** kana soo baxay Waaxda Dhulka Dowlada hoose ee Muqdisho. Waxaana Dhaxalka Gurigaan iska leh oo kaliya Dhaxaltooyada hoos ku qoran oo kala ah:-

- 1- **Sahro Maxamed Cusmaan** ina Muxubo Isaaq Salaad ku dhalatay B/weyne Sanadkii **1965** kuna degan wadanka ingiriiska Magaca **Liino Shariif Maxamed Cusmaan** wadata **I D N. R.D 3225965 Uk** ah. **(Gabadhii Marxuumadda).**

2- Ayaan Maxamed Cusmaan ina Muxubo Isaaq Salaad ku dhashay B/weyne Sanadkii 1983 kii, (Gabadhii Marxuumadda).

3- Canab Maxamed Cusmaan ina Muxubo Isaaq Salaad ku dhashay B/weyne Sanadkii 1976 dii (Gabadhii Marxuumadda).

4- Faa'iso Maxamed Cusmaan ina Muxubo Isaaq Salaad ku dhashay B/weyne Sanadkii 27 sana jir ah (Gabadhii Marxuumadda).

5- Cabdiraxmaan Maxamed Cusmaan ina Muxubo Isaaq Salaad ku dhashay B/weyne Sanadkii 1978 dii (Wiilkii Marxuumadda).

Sidoo kale 3/da Markhaati waxa ay Maxkamadda horteeda ka caddeeyeen kana marag fureen in dadka kor lagu soo sheegay oo kaliya ay leeyihiin dhaxalka Marxuumad **Muxubo Isaaq Salaad** mana jirto cid kale oo Dhaxalkeeda wax ku leh, ayna mas'uul buuxa ka yihiin wixii burin Sharci ah ee ku yimaada hadii ay soo baxdo cid kale oo dhaxalka wax ku leh. mana jirto cid deyn ku leh ama ay u dardaarantay in wax laga siiyo Hantideeda, Marxuumda labadeedii waalidna waxa ay dhinteen intii ay nooleed lamana qabin markii ay dhimanaysay.

Sedaxda Marqaati waxa ay Maxkamadda horteeda si buuxda uga markhaati kaceen in Dhaxaltooyada kala ah:-1- Sahro Maxamed Cusmaan 2- Canab Maxamed Cusmaan 3- Cabdiraxmaan Maxamed Cusmaan Waxa ay wakiisheen Walaashood: Ayaan Maxamed Cusmaan sida ku cad :- 1-Wakaalada tixraaceedu yahay Ref 096/17, kuna taariikheysan Tr. 3/4/2017 kana soo baxday Assunnah Islamic Center 565A/567A High Road Tottenham – London/N 17 6SB. kuna Saxiixan yahay Mamulaha Guud Daa'uud Cabdullahi Shiikh Cali 2- Wakaaladda kale tixraaceedu yahay Ref 094/17 taariikheysan Tr. 3/4/2017 kana soo baxday Assunnah Islamic Center 565A/567A High Road Tottenham –London/N 17 6SB. kuna Saxiixan yahay Mamulaha Guud Daa'uud Cabdullahi Shiikh Cali 3- Wakaaladda kale ee ku taariikheysan Tr. 03/04/2017 kana soo baxday islaamiska Forbundet i jarva(IFIJ) Ee wadanka Sweden, Kuna Saxiixan yahay Gaduumiyaha Center ka: Cabdulqadir Shiikh Maxamed. waxa ay u wakiisheen Ayaan Maxamed Cusmaan in ay gadi karto Hibeyn karto ,Hanti kale ugu bedeli karto, Canshuuri karto, kireyn karto uga doodi karto Maxkamadaha hortooda, Musaalaxo ka geli karto,Qareen u qaban karto, Saxiixi karto dukumiinti kasta oo u baahan in magacyadooda lagu saxiixo, hortagi karto madal kasta oo khuseeneysa hantida Maguurtada ah tilmaamiheedu ay kor ku xusan yihiin, sidoo kale waxay u gudoomi kartaa wax allaala wixii qeyb ahaan uga soo gaara hantidaas ayada oo ka wakiil ah walaalaha magacyadoodu kor ku xusan yihiin.

La wakiishuhuna waa ay aqbashay Wakaaladahaas.

Sidoo kale 3/da Markhaati waxa ay Maxkamadda horteeda ka caddeeyeen in Faa'iso Maxamed Cusmaan oo dhaxaltooyada ka mid ah ay tahay qof ka

xanuunsan xagga dhimirka ayna Gacanta ku haayso walaasheed Ayaan Maxamed Cusmaan ayaduna ay Mas'uul ka tahay wixii hanti ah oo ay ka hesho dhaxaka hooyadeed iyo walaakeed Cabdi Maxamed Cusmaan oo geeriyooday sanadii 2014 ka dhaxalkiisana ay wax ku leedahay.

Saxiixyada iyo Magacyada Sugayaasha

1 - Muumin Duqow Liibaan _____

2- Xasan Maxamed Lugey _____

3- Cilmi Cusmaan Liibaan _____

Maxkamada Degmada Wardhiigley Maanta oo ay taariikhdu tahay 08/04/2017 Iyadoo Cuskaneyna Caddeynta Marqaatiyaasha Sare Ku Xusan waxay Sugtay asixisayna: dhaxalkoobka ,Tarikada ,Qayimka iyo iswakiilashada, waana mid ansax ah oo waafaqsan Sharciga Islaamka Iyo Qaanuunka Dalka, Maxkamaduna Waxay ku qortay Diiwaankeeda Guud ee Mucaamilaadka.

Guddoomiyaha Maxkamadda Degmada Wardhiigley

Sh. Yuusuf Xasan Abuukar.

Kaaliyaha Maxkamadda

C/llaahi Maxamed Muuse





Ujeeddo: wakaalad Gaar ah.

Date: 30/03/2021

Maanta oo ay taariikhdu tahay 30/03/2021 waxaa wakalaadaan bixinaya Aniga oo ah **Zeinab Mohamed Osman**, Soomaali ah, ku dhashay Gendershe sanadkii 1980-kii, leh passport 563825397 ee halkaan ku lifaaqan, isla markaasna ka caafimaad qaba wax allaale iyo wixii wax u dhimi kara maskaxda iyo jirka bini aadamka cid i qasabtayna aysan jirin qowl iyo ficilba, waxaan halkaan si buuxda uga caddeynayaa in aan wakaalad gaar ah siiyay **Liin Maxamed Cusmaan**, Soomaali ah, ku dhalatay Beled-weyne sanadkii 1965-tii, degan Mogadishu, waxaana u wakiishay qeybta aan ku leeyahay dhaxalka hooyadeey marxuumad Muxuba isaaq Salaad oo ah dhul ku yaalla Degmada X-jadiid kana kooban cabir dhan 20X20/M Lotto No: 291 leh WML: B19/B41/sanad78 ee tr 26/01/2021 ahna duplicate kana soo baxay dawladda hoose ee Muqdisho waxaana u siiyay awood buuxda oo dhinac walba ah, waa dhisi kartaa, waa kireyn kartaa, waa u dacwoon kartaa, waa gadi kartaa, waa hibeyn kartaa, waa rahmi kartaa, waxayna ka taagan tahay meeshii aan ka taagnaa qeybta iga soo aada dhaxalka marxuumad Muxuba isaaq Salaad oo aan dhaxal u yeesho, waxaana wakaaladaan gaarka ah bixiyay anigoo ka caafimaad qaba wax allaale iyo wixii wax u dhimi karaya maskaxda iyo jirka bini aadamka cid i qasabtayna aysan jirin qowl iyo ficilba, waxaana markhaatiyaal ka ahaa wakaaladaan raga hoos ku qoran.

Saxiixa wakaalad Bixiyaha

Zeinab Mohamed Osman Zeinab

Saxiixa Markhaatiyaasha

1. Asad Cabdisalam Nur Asad
2. Abdidahir Hassan Ahmed Abdidahir

Xafiiska Nootaayo Banaadir-Danuun

Saxiixa la Sugay

TIX: NBDUKB1/1267/2021

Anigoo ah Dr.Yonis Abdirahman Mohamud leh xafiiska Nootaayo Banaadir-Danuun oo ku yaala London waxaan halkaan ku sugayaa in saxiixyada sare ku qoran ay yihiin kuwii dhabta ahaa ee wakaalad bixiso **Zeinab Mohamed Osman** iyo markhaatiyaasha Asad Cabdisalam Nur & Abdidahir Hassan Ahmed, waxayna ku saxiixeen Xafiiska dhexdiisa iyadoo aan cidina aysan qasbin, wayna ku qanceen ka dib markii ay iska aqriyeen waxaana ku qoray diwaanka guud ee nootaayada

Xafiiska Nootaayo Banaadir-Danuun
Dr.Yonis Abdirahman Mohamud (Timacadde)

NOOTAAYO BANAADIR-DANUUN
DR.YONIS ABDIRAHMAN MOHAMUD
Tel: 09447926533914
E-Mail: avvyonistimo@gmail.com



DAYAH MUGADISHU NOTARY PUBLIC
DR' ADEN JUM'ALE MOHAMED
TEL:- +252615189259 / 0722148780

XAFIISKA NOTAAYAHA
DAYAX MUQDISHO
Original
Laanta Nairobi Kenya

REP. NO.22103/21. Email: Dayax600@gmail.com, calinotaayo66@hotmail.com

Tr: 25/04/2021.

UJEEDO: QIRAAL TANAASUL IYO WAKAALAD GAAR AH

Nairobi maanta oo ay tariikhdu tahay 25/04/2021, Anigoo ah ABDIRAHMAN MOHAMED OSMAN, Sharciguna ku sita ABDIRAHMAN OSMAN MOHAMED, Somali-British ah, ku dhalatay Muqdisho 1956-dii, hooyo Culuso Nuur Maxamuud, hadana ku sugan Nairobi-Kenya, ayaan waxaan qoraalkaan ku Qirayaa in aan Ka Tanaasulay Qeybta Dhaxalka ah ee aan ku Leeyahay Guriga ay ka geeriyootay Hooyadey **Marxuumad: Muxuba Isaaq Salaad**, Waxaana uga Tanaasulay Qismigeysa dhaxalka ah dhaxaltooyada inteyda kale, intaas ka dibna waxaan u Wakiishay **LIIN SHARIF MOHAMED OSMAN**, Somali-British ah, Leh Passport No.559771275, dagan Muqdisho, in Qismigeysa ku wareejin karto Dhaxaltooyada Marxuumad Muxuba Isaaq Salaad, gadi karto, iibin karto, dayactiri karto, u dacwoon karto, qareen u qaban karto, uga doodi karo maxkamadaha hortooda maslaxadna ka galo Guriga dhisan ee ku yaala Magaaladda Muqdisho, degmadda **Wardhigleey**, Xafadda X-Jadiid, Cabirkiisuna yahay **20X20-M, Lotto No.291**, Sohdhintiisuna tahay Waqooyi iyo Bari **Jid**, inta kale dhul dad, **Leh Warqadda Lahaanshaha Bollettario No.3, Bolletta No.46, Sanadka:2021, Tr.26/01/2021, Leh Warqadda Lacag qabashada No.10896, Tr.26/01/2021**, (ahna Duplicate), kana soo baxday Dawladda Hoose Ee Muqdisho Waxda Dhulka, Leh Warqadda Cadeynta Lahaanshaha Dhulka Prot No.34/2021, Tr.9/2/2021, kana soo baxday xafiiska hubinta Dukumeentiyada dhulka, uuna ku saxiixanyahay madaxa xafiiska Cumar Macalin Xasan (Cumar Tukumbo), Sidaas darteed Anigoo ah ABDIRAHMAN MOHAMED OSMAN, waxaan sii caddeynaya in wakiilkeeyga LIIN SHARIF MOHAMED OSMAN, u madaxbanaan tahay ku wareejinta Dhaxaltooyada inteyda kale ee Qismiga dhaxaleyd Ee liga soo aada Gurigaas laga dhaxlaayo Marxuumad Muxuba Isaaq Salaad, isla markaasna igu matali karto goob iyo madal walbo ee la liga baahdo Suul iyo saxiixba khuseysana gurigaas kor ku xusan, waxaana Tanasulkaan iyo Wakaaladdaanba saxiixay Anigoo miirkeeygu taam yahay, waxgaradkeeygu wanaagsan yahay xor'ahay, cidna i qasbin, wax alaale iyo wixii aan ku cadeyn Tanasulkaan iyo wakaaladaan gaarka ah waxaa loo raacayaa sida uu sharcigu qabo.

1. ABDIRAHMAN MOHAMED OSMAN (Tanaasule ahna Wakiishe) _____

2. LIIN SHARIF MOHAMED OSMAN (LA WAKIISHE) _____

SAXIIXA MARQAATIYAASHA

1. HASSAN AHMED JINAOW _____

2. IBRAHIM KHALIL MOHAMED MAALIM NOOR _____

SAXIIXA LA SUGAY
XAFIISKA NOTAAYAHA DAYAX

Anigoo ah Dr' Aadan Jima'ale Mohamed (Dayax), Notaayo Muqdisho ah, laanna ku leh dalka Kenya magalada Nairobi, waxaan cadaynayaa in saxiixyada kor ku cad ay yihiin kuwii dhabta ahaa ee ABDIRAHMAN MOHAMED OSMAN, Somali-British ah, ahna wakiishe, iyo Midkii la wakiishaha Ee LIIN SHARIF MOHAMED OSMAN, Somali-British ah, iyo kuwa labada marag, oo qoraalkaan wakaalada gaarka ku saxiixeen Xaafiiska Notaayaha hortiisa.

By: **Mohamed Ali Osman**



(Xafiiska notaayaha dayax)
(Dr' Aadan Jim'ale Mohamed)

25 APR 2021





FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
YAAQSHIID DISTRICT COURT
MOGADISHU-SOMALIA

Summad:MDYAAQ/391/2021

Tr:27/04/2021

Ujeedo:-Sugitaan tirakoob dhaxaltooyo 2/bo boos & wakaalad.

Maanta oo ay taariikhdu tahay 27/04/2021 waxaa Maxkamadda Degmada Yaaqshiid horteeda yimid
A) **Maxamed Cali Cigaal** ina Xaawo Cali Axmed, ku dhashay Mogadishu/Somalia, dhashay
01/Jan/1975, deggan degmada Yaaqshiid, sita aqoonsi No: 0062978/Dowladda Hoose ee Muqdisho.
Kana wakiil ah qaar ka mid ah dhaxaltooyada Marxuumad **Sahro Cali Xaashi Cigaal** oo kala ah:-

- 1) **Cabdirisaaq Maxamed Xasan-Adde** ina Caasho Sh. Maxamed Cawaale, dhashay 25/04/1958, sita passport No: 542891820/GBR.
- 2) **Ibraahim Cabdirisaaq Maxamed Xasan-Adde** ina Sahro Cali Xaashi Cigaal, dhashay 1989, kuna jooga Uk magac **Ibrahim Hassan-Adde**, sita leysin No: **Hassa 808029199LG 08 /Uk.**
- 3) **Ismaaciil Cabdirisaaq Maxamed Xasan-Adde** ina Sahro Cali Xaashi Cigaal, dhashay 24/06/1999, sita leysin No: **Hassa906249199PF31/Uk.**
- 4) **Sowda Cabdirisaaq Maxamed Xasan-Adde** ina Sahro Cali Xaashi Cigaal, dhalatay 01/05/1992, kuna joogta Uk magac **Sawdah Hassan-Adde**, sidata leysin No: **Hassa955012S99NC47/Uk.**
- 5) **Sumayo Cabdirisaaq Maxamed Xasan-Adde** ina Sahro Cali Xaashi Cigaal, dhalatay 06/12/1990, kuna joogta Uk magac **Sumayah Hassan-Adde**, sidata leysin No: **Hassa962060S99HC27/Uk.**
- 6) **Xafso Cabdirisaaq Maxamed Xasan-Adde** ina Sahro Cali Xaashi Cigaal, dhalatay 04/11/1996, kuna joogta Uk magac **Hafsah Hassan-Adde**, sidata leysin No: **Hassa955012S99NC74/Uk.**
- 7) **Caasho Cabdirisaaq Maxamed Xasan-Adde** ina Sahro Cali Xaashi Cigaal, dhalatay 09/04/1994, kuna joogto Uk magac **Aisha Hassan-Adde**, sidata leysin No: **Hassa954094A99CG81/Uk.**
- 8) **Safiya Cabdirisaaq Maxamed Xasan-Adde** ina Sahro Cali Xaashi Cigaal, dhalatay 10/04/2003, kuna joogta magac **Safiah Hassan-Adde**, sidata aqoonsi No: **Hassa054103S99NG81/Uk.**

Sida ku cad warqadda wakaaladda summadeedu tahay **SOMEMB/FR/WAK/120/2021** ee tr: 17/04/2021, kana soo baxday Safaaradda Soomaaliya ee France, uuna saxiixay Qunsulka Safaaradda Soomaaliya France **Ahmed M. Hagi Ali {Ahmed Shire}**, lagana tasdiiqay Wasaaradda Arimaha Dibadda ayna hubisey Maxkamadda Racfaanka ee Gobalka Banaadir sida ku cad Ref No: **558/2021** kuna taarikheysan 24/04/2021.

B) **Xaawo Faarax Sahal {Hooyadii Mrxuumada}** deggan Xamar dhalatay 1937, sidata passport No: **555120183/GBR**, kana mid ah dhaxaltooyada Marxuumad **Sahro Cali Xaashi Cigaal**

Waxayna Maxkamadda ka codsadeen in loo qoro sugitaan tirakoob dhaxaltooyo 2/bo boos & wakaalad. Maxkamaddu waxay u dirtay marag, waxayna keeneen dadka kala ah:-

- 1) **Cilmi Cabdulle Yuusuf** ina Roobo Baraale Kulmiye, ku dhashay Xarardheere/Somalia, deggan degmada Yaaqshiid, dhashay 1962.
- 2) **C/raxmaan Maxamed Cali** ina Asli Cali Wehliye, ku dhashay Mogadishu/Somalia, deggan degmada Yaaqshiid, dhashay 13/Feb/1999, sita passport No: **P00829448/Somalia.**

Waxeyna iyagoo taam ah xagga caafimaadka & xoriyadaba caddeeyeen arimaha soo socda.

Qeybta laad.

In Marxuumad **Sahro Cali Xaashi Cigaal** ay ku geeriyootay London/Uk markey taariikhdu markey aheyd 22/03/2021, waxeyna ifka kaga tegtay dhaxaltooyo ka kooban sida tan soo socda



- 1) Xaawo Faarax Sahal
- ✓ 2) Cabdirisaaq Maxamed Xasan-Adde
- ✓ 3) Ibraahim Cabdirisaaq Maxamed
- ✓ 4) Sumayo Cabdirisaaq Maxamed
- ✓ 5) Sowda Cabdirisaaq Maxamed
- ✓ 6) Caasho Cabdirisaaq Maxamed
- ✓ 7) Xafso Cabdirisaaq Maxamed
- ✓ 8) Ismaaciil Cabdirisaaq Maxamed
- ✓ 9) Safiya Cabdirisaaq Maxamed

- {Hooyadii Marxuumada} deggan Xamar.
{Zawjkii Marxuumka} deggan Uk dhashay 1958.
{Awlaad} deggan Uk dhashay 1989.
{Awlaad} deggan Uk dhalatay 1990.
{Awlaad} deggan Uk dhalatay 1992.
{Awlaad} deggan Uk dhalatay 1994.
{Awlaad} deggan Uk dhalatay 1996.
{Awlaad} deggan Uk dhalatay 1999.
{Awlaad} deggan Uk dhalatay 2003.

Waxaa dhaxlaaya hooyadeed, Zawjkeeda & awlaadeeda sare ku xusan oo kaliya,2/deeda waalidna wey ka geeri horeeyeen mana jirto cid kale oo marxuumada dhaxashay oo nool ama geeriyootay asal ah ama farac, waxeyna ka dhaxlayaan:-2/bo boos oo ku yaalla Xamar degmada Yaaqshiid,W.Dh: 20X30 Mittir,lotto No: kala ah 7590, iyo 7592 soohdintooduna yihiin Galbeed dhul dad, inta kale jidad, kuna milkisey W.M.No:5296/2001 ee tr: 18/08/2001, kana soo baxday Maxkamadda Degmada Hodan ee Xamar, uuna saxiixay **Dr.Cabduqaadir Sh.Xassan Cadde.**

Qeybta 2/aad
Wakaalad.

Sidoo kale **Xaawo Faarax Sahal {Hooyadii Mrxuumada}** deggan Xamar dhalatay 1937, sidata passport No: 555120183/GBR.


Waxey Maxkamadda horteeda ka caddeysey ayadoo taam ah xagga caafimaadka & xuiyadaba in ay wakiilatay **Maxamed Cali Cigaal** ina Xaawo Cali Axmed, ku dhashay Mogadishu/Somalia, dhashay 01/Jan/1975, deggan degmada Yaaqshiid, sita aqoonsi No: 0062978/Dowladda Hoose ee Muqdisho.

Dhammaan wakaalad bixiyaasha sare ku xusan waxey **Maxamed Cali Cigaal** u wada wakiisheen in uu u gadi karo, u dhisi karo,u dacwoon karo, u ijaari karo, qareen u qaban karo, maslaxana ka geli karo, heshiisna ka geli karo, noona saxiixi karo ducomenti kasta ee ku saabsan dhaxalkaas, noogana yahay wakiil buuxa, la wakiishuhuna wuu aqbalay wakaalashadaas, waxaana marag ka ah isla maragta sare ku xusan.

MAXKAMADDA DEGMADA YAAQSHIID

Sidaas darteed waa sugitaan tirakoob dhaxaltooyo 2/bo boos & wakaalad, ansax ah waafaqasan Sharciga Islaamka iyo qaanuunka dalka, Maxkamadduna waxey ku qortay kuna saxiixday diiwaanka guud ee mucaamilaadka Maxkamadda.

Kaaliyaha Maxkamadda
Samatalis Barre Nuur.



Guddoomiyaha Maxkamadda
Dr:Maxamed Xasan Maxamed.

